Bloodworks Northwest

# Adeegyada Dhiigga Xuddunta

**Oggolaanshaha Hooyada ee Ku Deeqidda Dhiigga Xuddunta**

**Macluumaadka Asaasiga ah:** Dhiigga xuddunta, oo sida caadiga ah la iska tuuro dhalmada ka dib, ayaa wuxuu hodan ku yahay unugyada dhiga ee istara, unugyada aan kobcin ee dhiigga ee soo saara unugyada cusub ee dhiigga jirka, waxaana uu dhiigga xuddunta noqon karaa il laga helo unugyadaan marka dhuuxa lafta loo gelinayo/lagu talaalayo bukaannada qaba cudurka kaansarka dhiigga, kaansarada kale ee dhiigga, iyo cuduro kale oo kala duwan. Maaddaama heerka loo baahan yahay ee is-lahaanshaha gelinta/ku-talaalidda dhiigga xuddunta uu naadir yahay, qowmiyadaha tirada yar iyo bukaannada qaba noocyada unugyada dhiifka ah ayaa waxay badanaa ka heli karaan is-lahaanshaha haboon keliya iyagoo adeegsanaya dhiigga xuddunta. In ka badan 20% gelinada/ku-talaalidda lagu sameeyo Barnaamijka Qaran ee Ku-deeqaha Dhuuxa Lafta (National Marrow Donor Program) ayaa ah gelinada/ku-talaalidda dhiigga xuddunta.

Oggolaanshahaaga ayaa kuu oggolaanaya inaad ku deeqdo dhiigga xuddunta ee ilmahaagu adigoo raacayo hab aan waxyeelo u lahayn ilmuhu. Dhiigga xuddunta waa shey caadi ahaan la iska tuuro. Waxaa dhiiggaaga laga baari doonaa cudurada la is-qaadsiiyo sida fayruuska dila iska-difaacidda jirka aadanaha (HIV) iyo cagaarshowga. Qaybaha dhiigga xuddunta ee la heli karo laguna kaydiyo bangiyada dhiigga ee dadweynaha ayaa badbaadiya noolasha kumanaan kun oo bukaan sanad walba. Haddii aad ka qaybqaadatid barnaamijkan, dhiigga xuddunta ee ilmahaagu ayaa la uruurin doonaa, oo, haddii uu kaydin u qalamana, lagu kaydin doonaa Adeegyada Dhiigga Xuddunta ee Bloodworks iyadoo la barafeeyay. Waxaa lagu dari karaa Diiwaanka Barnaamijka Qaran ee Dhiigga Xuddunta (National Cord Blood Inventory, NCBI) waxaana la siin karaa bukaannada u baahan u gelinta/ku-talaalidda iyada oo loo marayo Barnaamijka Gelinta/Ku-talaalidda Unugyada Aan Kobcin (C.W. Bill Young Cell Transplantation Program) iyo diiwaanka "Be the Match". Dhiigga ayaa lagu wareejin karaa laguna keydin karaa goob kale oo NCBI ah. Barnaamijka Qaran ee Ku-deeqaha Dhuuxa Lafta (National Marrow Donor Program, NMDP) ayaa ka shaqeeyaa diiwaanka “Be the Match” wuxuuna ka mid yahay qandaraasleyaasha Dowladda Maraykanka ee Barnaamijka Gelinta/Ku-talaalidda Unugyada Aan Kobcin (C.W. Bill Young Cell Transplantation Program).

**Hab-raacyada:** Waxaad ka jawaabi doontaa su’aalo faahfaahsan oo ku saabsan taariikhdaada caafimaad iyo mida qoyskaaga. Waxa kale oo jira su'aalo ku saabsan qaab nololeedkaaga hadda jira iyo qaab nololeedkaagii hore, oo ay ku jiraan taariikhda galmada iyo su'aalaha isticmaalka daroogada kuwaas oo la mid ah su'aalaha la weydiiyo deeq-bixiyeyaasha dhiigga. Bloodworks waxay sidoo kale dib u eegi doontaa diiwaankaaga caafimaad iyo diiwaanka caafimaad ee ilmahaagu ee la xiriira dhalmada. Macluumaadkaan oo dhan waa qarsoodi waxaana loo isticmaalaa keliya in lagu go’aamiyo in dhiigga xuddunta uu ku habboon yahay in loo kaydiyo gelinada/ku-talaalidda mustaqbalka ah.

Dhiigga xuddunta ayaa la uruurin doonaa kadib markuu ilmahaagu dhasho oo xarigga xudduntana la ceejiyo/xiro hadana la jaro. Waqtiga ceejinta/xirida xariga xuddunta waxaa go'aaminaya dhakhtarkaaga

dhalmada/ummulisadaada iyadoo la raacayo hab-dhaqankiisa/keeda caadiga ah mana aha mid ay saameyneyso haddii dhiigga xuddunta la uruurinayo iyo haddii kaleba. Uruurinta dhiigga xuddunta waa inaysan wax halis ah gelinin adiga iyo cunuggaagaba. Xariga xuddunta ayaa la nadiifin doonaa, irbad ayaa la gelin doonaa xididka xuddunta, kadibna dhiigga xuddunta ayaa lagu shubi doonaa bac lagu uruuriyo. Bacda uruurinta ayaa kadib la xiriyaa, la calaamadeynayaa, loona dirayaa Bloodworks halkaas oo baaritaanno lagu sameeynayo si loo go'aamiyo in dhiigga xuddunta ku habboon yahay in loo kaydiyo gelinada/ku-talaalidda mustaqbalka ah. Haddii dhiigga xudduntu leeyahay tiro unugyo oo ku filan uuna maro dhammaan baaritaanada, dhiigga oo ay la socdaan sambalada baaritaanka ayaa markaa la habeeynayaa. Dhiigga xuddunta iyo saamballada ayaa markaa la barafeynayaa waxaana la kaydin karaa muddo aan xadidnayn. Qaybaha dhiigga ayaa lagu kaydiyaa Bloodworks ee ku taalo Seattle, WA. Haddii dhiiggaaga la kaydiyo laakiin la arko inuusan haboonayn goor dambe, waxaa laga soo saari doonaa diiwaanka waana la burburin doonaa. Haddii uusan ku habooneyn kaydinta, waa la tuuri karaa, waxaa loo adeegsan karaa ujeeddooyinka tayo eegida, waxaa loo adeegsan karaa hagaajinta qaababka loo habeeyo dhiigga xuddunta, ama waxaa loo isticmaali karaa cilmi-baaris kale. Haddii dhiigga xuddunta ee ilmahaagu loo isticmaalo cilmi-baaris, looma calaamadeyn doono qaab u oggolaanayo cilmi-baarayaashu in ay aqoonsadaan adiga ama ilmahaagaba. Qaar ah tusaalooyinka mashruucyada cilmi-baarista ee qaybaha dhiigga xuddunta loo dira waa balaarinta unugyada dhiigga xuddunta ee istara si loo caawiyo bukaannada gelinta/ku-talaalidda iyo in unugyada dhiigga xuddunta ee istara loo beddelo unugyada cas ee dhiigga ama unugyada ka hortagga xinjirowga. Wax kharash ah adiga kuguma joogto inaad ku deeqdo dhiiggaaga xuddunta iyo inaad ka qaybqaadatid barnaamijkan.

**Baarista:** Sambal dhiiggaaga ah ayaa la qaadi doonaa markay dhalmada ilmahaagu soo dhawaato. Haddii dhiigga xuddunta u qalmo kaydinta, dhiiggaaga iyo dhiigga ilmahaagu ayaa laga baari doonaa xaaladooyin kala duwan oo la xiriiro hiddaha, sida borotiinka qaada oksijiinka oo aan caadi ahayn, iyo cudurada la is-qaadsiiyo, oo ay ku jiraan HIV iyo cagaarshowga. Baarista borotiinka qaada oksiinka ayaa si otomaatik ah loogu sameeyaa carruurta ku dhasha gobolka. Markaad saxiixda foomkan, waxaad u oggolaaneysaa barnaamijka baarista dhalaanka ee gobolka inuu bangiga kaydinta dhiigga u sii daayo macluumaadka baarista borotiinka qaada oksiinka si uu dhiigga xuddunta ugu qalmo kaydinta bangiga dhiigga. Ogaanshaha in adiga ama ilmahaagu aad qabtiin cudur la is-qaadsiiyo ama xaalad/cudur hiddo ayaa kuu oggolaan doona inaad raadsatid daaweyn laakiin waxay kugu adkayn kartaa inaad heshid caymis caafimaad. Dhiiggaaga ayaa sidoo kale la qiimeyn karaa si loo ogaado in unugyada kala duwan is qaadan karaan, waxaana qaar ka mid ah dhiiggaaga iyo dhiigga xudduntaada loo kaydin karaa baaritaano suurtogal ah mustaqbalka. Waxaad xanuun ama nabaro ka dareemi kartaa goobta dhiigu laga bixiyay.

**Macluumaad kale:** Wax kharash ah adiga kuguma joogto inaad ka qaybqaadatid barnaamijkan dadweeynaha ee kaydinta dhiigga xuddunta. Haddii aan ogaano natiijooyin kasta oo muhiim u ah caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahaaga ama saameeynaya u qalmiddaada dhiig ku-deeqidda, waanu kula soo socodsiin doonnaa. Si aad si fiican ugu turjuno uguna fahano natiijooyinka daraasadahan ama baaritaanadan, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto inaan kula soo xiriirno si loo sameeyo baaritaan dabagal ah. Diiwaannada ku-deeqaha dhammaan ayaa si adag u qarsoodi ah. Si kastaba ha noqotee, sharciga gobolka aad ku nooshahay ayaa uga baahan Bloodworks in ay waaxda caafimaadka deegaanka u soo sheegaan magacyada dhammaan dadka la xaqiiiyay inay qabaan qaar ka mid ah cudurada la is-qaadsiiyo sida HIV iyo cagaarshowga. Diiwaanada ku-deeqaha waxaa dib u eegi kara hay'adaha sharci dejinta sida Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA), wakaaladaha maalgelinta sida Maamulka Kheyraadka iyo Adeegyada Caafimaadka, Barnaamijka Qaran ee Ku-deeqaha Dhuuxa Lafta iyo ururada ansixinta. Waxaan sameyn doonaa

dadaal kasta si aan u ilaalino qarsoodigaaga iyo qarsoodiga ilmahaagu. Marka dhiigga xuddunta la geeyo Bloodworks, waxaa loo yeeli doonaa lambar lagu aqoonsado. Kani waxaa loo isticmaali doonaa dhammaan sambalada dhiigga xuddunta inta lagu jiro baarista iyo habeeynta. Diiwaanada ku-deeqaha ee magacaaga ku xiraya lambarkaaga ayaa la gelin doonaa fayl xiran waxaana lagu kaydin doonaa kombiyuutar yaalo goobaha xaddidan ee Bloodworks.

Marka macluumaadka dhiigga xuddunta ee ilmahaagu lala wadaagayo xarumaha gelinta/ku-talaalidda ee suurtagalka ah, lama wadaagi doono macluumaad shakhsi lagu aqoonsan karo. Macluumaadkaas khaaska ah waxaa si ammaan ah u hayn doonta xarunta dhiigga. Waxaa jirta suurtogal dhiif ah oo ah in macluumaadkaaga gaarka ah baxsado laakiin Adeegyada Dhiigga Xuddunta ee Bloodworks waxay ku kaydiyaan dhammaan macluumaadka ku-deeqaha meel aamin ah oo qarsoodi ah sidaas darteed shaqsiyaad ruqsad u haysta keliya ayaa heli karo mana jiro wax macluumaad shaqsiyeed ah oo lala wadaago baarayaasha cilmi-baarista. Haddii uu jiro isbeddel ku yimaada caafimaadka ilmahaagu, Adeegyada Dhiigga Xuddunta ee Bloodworks waxay jeclaan lahaayeen inay ogaadaan madaama ay saameyn ku yeelan karta habboonaanta unugyada gelinta/ku-talaalidda. Haddii dhiigga xuddunta ee ilmahaagu loo codsado gelin/ku-talaalid, waxaan isku dayi doonnaa inaan kula soo xiriirno si aan wax kaaga weydiino caafimaadka ilmahaagu tani iyo wakhtigii ku-deeqida dhiigga xuddunta.

Waxaa jira bangiyada dhiigga xuddunta oo gaar loo leeyahay ("qoyseed") kuwaas oo u kaydin doona dhiigga xuddunta ilmahaagu keliya isticmaalka ilmuhu ama isticmaalka qoyska ilmuhu. Adeeggan waxaa loo heli karaa lacag la'aan waana in aad horey u sii diyaarsato haddii aad rabto. Intaa waxaa dheer, waxaad dooran kartaa in dhiigga xuddunta ee ilmahaagu aad gaar ahaan ugu deeqdo in lagu isticmaalo cilmi-baaris. Waa inaad la hadashid daryeel caafimaad bixiyahaaga ama isbitaalka aad ku umuli doontid haddii aad jeceshahay inaad ogaato in xulashadan aad heli kartid. Ugu dambeyntii, waxaad dooran kartaa inaadan waxba ku sameynin dhiigga xuddunta ee ilmahaagu taasi oo macnaheedu yahay in markaa qashin ahaan la iskaga tuuri doono.

Markaad ku deeqdo dhiiggaagan xuddunta, waxaad oggolaanaysaa in dhiiggaaga xuddunta ee aad ku deeqday loo isticmaali karo gelinta/ku-talaalidda unugyada dhiigga ee istara (sidoo kale loo yaqaan gelinta/ku-talaalidda dhuuxa lafta), cilmi-baaris iyo horumarin, ama lagu isticmaali karo bedeecad ganacsi oo loo isticmaali karo in dadka lagaga caawiyo dhibaatooyinkooda caafimaad. Ku-deeqiddan kama heli doontid wax maaliyad ah. Mar haddii dhiiggaaga xuddunta lagu deeqo wax awood ah kuma lihid sida loogu isticmaali doono gelinta/ku-talaalidda, cilmi-baarista ama ujeeddooyinka ganacsi dibna looma soo celin karo mar haddii la isticmaalo.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah waxaad ka wici kartaa Isuduwayaasha Barnaamijka Ku-deeqidda Dhiigga Xuddunta lambarka (206) 689-6696 ama xirirrika 1-800-DONATE-1. 6696.

**Bayaanka Hooyada:** Macluumaadka aan bixiyay ee ku saabsan taariikhdayda caafimaad iyo arrimaha halista ee HIV waa mid sax ah oo run ah. Waxaan fahansanahay in ilmahayga iyo anigaba aanan wax xaq ah ku lahaan doonin dhiigga xuddunta hadda ama mustaqbalkaba, haddii aan ku deeqo dhiigga xuddunta ee ilmahayga. Si kastaba ha noqotee, haddii mustaqbalka ilmahaygu ama qof kale oo ah qaraabo aan dhiig wadaagno u baahdo daaweynta gelinta/ku-talaalidda unugyada dhiigga ee istara, haddii dhiigga xudduntana weli la heli karo, Bloodworks ayaa awoodi karta inay siiso iyaga. Waxaan fahamsanahay dhammaan macluumaadka ku-deeqaha ee la soo bandhigay, dhammaan su'aalahaygii waa laga jawaabay, waxaan oggolahay inaan ku deeqo,waxaana fasaxayaa in Bloodworks lala wadaago macluumaadkayga caafimaad iyo midka ilmahayga haddii ay lagama maarmaan u tahay fududaynta ku deeqidda.

____________________________________ ______________________

Saxiixa hooyada Taariikhda

____________________________________ ______________________

Magaca Hooyada oo Xarfo Waaweyn Ku Qoran Taariikhda Dhalashada Hooyada